Faahfaahinta Barnaamijka

Barnaamijka ELLka ee degmada 196 waxa uu ardayda ka gargaaraa barshada afka ingiriisiga si ay ugu wanaagsadaan waxbarashada fasalka iyo wixii ka baxsan sida uu qabo xeerka u degsan gobolka Minisoota ee heerka laga rabo ardayda afka ingiriisiga wax ku barata. Macalimiin takhasus ku leh barashada afka ingiiriga ayaa la shaqeeya ardaya baranaysa afka ingiriisiga ee dhigata dugsiyada hoose, dhexe iyo kuwa saraba ee degmadan. Ardayda ku cusub degmada 196aad waxaa laga qaadaa marka ay bilaabayaan waxbarashada imtixaan lagu qimeeynayo heerkooda luqadda ingiriisiga, sidaas oo kale ayaa hadana markii mudo la joogaba lagu sameeyaa qiimayn joogta ah si loo ogaado horumarka ay sameeyeen iyo sida ay barnaaamijkan xaq ugu sii yeelanayaan.

Degmada 196 waxa ay ardaydu wax ku bartaan afka ingiriisiga. Ardaydana waxaa loo wada fariisiyaa kooxo kooxo isku heer ah waxaana suurogal ah in ay wadaagaan ama aanay wadaagin luqad kaliya.

Barashada afka Ingiirisiga ee habka tusaalaynta

Barnaamijka ELLka ee degmada 196 waxa uu ardayda ka hormariyaa dhinaca akhrinta, qoraalka, ku hadalka iyo fahmidda luqadda si cilmiyaysan. Shaqaalaha barnaamijka ELLka waa shaqaale leh aqoonta ugu sareysa ee dhigista luqadda ee macalin fasal dhiga u yeelan lahaa. ELLku waxaa ku salaysan manhaj fasal fasal loo dajiyay.

Aqoonsiga ELLka
Minisoota, ELL waxaa loo yaqaanaa qof baranaya luqadda kaas oo:

(a) Markii ugu horeysay bartay aan af ingiriisi ahayn, ka yimid guri inta badan looga hadlo luqad aan af ingiriisi ahayn, ama aan afka ingiriisga aanu ahayn luqadooda aasaasiga ah; **iyo**
(b) Arday aan lahayn waxyaabihii muhimka ahaa ee looga baahnaa si ardaygu uga qayb qaato fasal afka ingiriiga wax lagu baranayo.

Qaybta (a) ee kore waxaa lagu qiyasaa su'aalo luqadeed loogu tala galay (HLQ). Imtixaanka HLQga waxaa laga qaadaa arday kasta oo waxbarasho ka bilaabaya degmada laga bilaabo xanaanada caruurta iyo fasalada ka sareeya luqadda ay doonaba haku hadlo

Qaybta (b) ee kore waxaa lagu qiyaasaa horumarka ardayga iyadoo la adeegsanayo qiyaaso iyo cabir go'an oo ay ka mid noqon karaan darsidda macalinka, qiimaynta macalinka, talo soo jeedinta waalidka iyo kaabayaal loogu tala galay in lagu cabiro horumarka ardaygu sameeyo.

Ardaygu in aanay luqadiisa aasaasiga ah af ingiriisiga ahayn kama dhigayso in EELka lagu daro. Waxaase dhici karta in ardayda qaar lagu daro barnaamijkan. Qaybtan ayaa ka hadlaysa sida lagu galo, nidaamka u degsan iyo sida ardaygu kaga bixi karo barnaamijka ELLka ee degmada 196.

Barnaamijka Ardayda baraynaysa afka ingiriisiga ee degmada 196.

Ku soo dhawaada barta internetka ee barnaamijka ardayda afka ingiriisga baranaysa (ELL) ee maamulka waxbarshada Degmada 196. Halka waxaad ka helaysaan xog badan oo la xiriirta barnaamijka ELLka taas oo faa'iido u leh waalidiinta, macalimiinta, ardayda iyo inta soo raacda.

Aqoonsiga, Gelitaanka iyo habka looga baxo barnaamijka ELLka

Shaxda hoos ku cad waxay inoo cadaynaysaa shuruudaha degmada 196 ay ku aqoonsato ardayda xaqa u leh inay ka faa'iideystaan barnaamijka ELLka. Sida uu qabo xeerka gobolka Minnesota ee ardayda aan si wanaagsan u aqoon afka ingiriisiga (LEP) waxaa ardayga loo aqoonsadaa inuu ELL xaq u leeyahay haddii

- Guriga looga hadlo af aan ahayn kan ingiriis
- Loogu aqoonsaday qiyaasaha lagu cabiro ardayda aan lahayn luqad ku filan oo ay kaga qayb gali karaan fasal af ingiriisi wax lagu baranayo.

Tallaabada 1aad
Qiimayntii lagu sameeyey ama talo soo jeedinta macalinka ayaa caddaysay in ardaygu leeyahay xaalad u ogolaanaysa ELLka

⇩

Tallaabada 2aad
Foomka diiwaangelinta ee degmada 196 iyo xog wareysiga aan rasmiga ahayn ee qoyska (oo inta badan ah marka la diwaan gelinayo) ayaa cadaynaya in ardaygu xaq u leeyahay ELL.

⇩

Tallaabada 3aad
Qiimaynta hadalka, qoraalka iyo akhrinta afka ingiriisiga ee ardayga

⇩

Tallaabada 4aad
Go'aanka ugu horeeya ee meelaynta ardayga
Haddii aanu ardygu si wanaagsan ugu gudbin mid ka mid ah sadexda qiimayn ee lagu sameeyay oo tallaabada sadexaad ee kore, waxa uu xaq u yeelanayaa adeegga ELLka.

⇩

Tallaabada 5aad
Wargelinta Waalidiinta
Waalidiinta waxaa lagu wargeliyaa toban cisho gudahood haddii gabadhooda ama wiilkoodu uu xaq u yeeshay in la diiwaageliyo adeegga ELLka. Waxaana sidoo kale la wargeliyaa darajada uu keenay ku hadalka, akhrinta iyo qoraalka afka ingiriisiga iyadoo la iscticmaalo foomka loogu tala galay ee degmada. Wargelintaas waxaa ka mid ah waqtiga ardaygu qaadanayo iyo nooca adeegga uu ka helayo ELLka. Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin inay ubadkooda ka reebi karaan barnaamijkan.

⇩

Tallaabada Lixaad
Adeegga ELLka
Ardayga oo laga taageero dhinaca akhrinta, qoraalka, ku hadalka/dhagaysiga

⇩

Tallaabada 7aad
La socoshada/ka saarista
Marka ardaygu ka gaaro darajada laga rabo akhrinta, qoraalka iyo ku hadalka afka ingiriisga ee qiyaasaha dugsiga iyo kan gobolkaba, ardayga waa laga saaraa barnaamijka ELLka

Aqoonsiga iyo Gelitaanka barnaamijka ELLka

Shaxda hoos ku cad waxay inoo cadaynaysaa shuruudaha degmada 196 ay ku aqoonsato ardayda xaqa u leh inay ka faa'iideystaan barnaamijka ELLka. Sida uu qabo xeerka gobolka Minnesota ee ardayda aan si wanaagsan u aqoon afka ingiriisiga (LEP) waxaa ardayga loo aqoonsadaa inuu ELL xaq u leeyahay haddii

- Guriga looga hadlo af aan ahayn kan ingiriis
- Loogu aqoonsaday qiyaasaha lagu cabiro ardayda aan lahayn luqad ku filan oo ay kaga qayb gali karaan fasal af ingiriisi wax lagu baranayo.

Tallaabada 1aad
Qiimayntii lagu sameeyey ama talo soo jeedinta macalinka ayaa cadaysay in ardaygu leeyahay xaalad u ogolaanaysa ELLka

⇩

Tallaabada 2aad
Foomka diiwaangelinta ee degmada 196 iyo xog wareysiga aan rasmiga ahayn ee qoyska (oo inta badan ah marka la diwaan gelinayo) ayaa cadaynaya in ardaygu xaq u leeyahay ELL.

⇩

Tallaabada 3aad

Qiimaynta ku hadalka, qoraalka iyo akhrinta afka ingiriisiga

- Qiimaynta xannaanada caruurta ee ELLka
- IPT 1 (1-5)
- IPT 2 (6-12)
- Talo soo jeedinta macalinka iyo waraysiga afka ah
- Diiwaankii horey looga qoray

Qiimaynta qoraalka

- Sahanka lagu sameeyo ardayda fasalka koowaad
- Qoraalka IPT (2-3)
- Qoraalka IPT (4-6)
- Qoraalka IPT (7-12)
- Diiwaankii horey looga qoray (darajada TEAE)
- Tijaabada qoraalka ee ardayga laga qaaday

Qiimaynta akhrinta

- Qiimaynta xanaanada caruurta ee ELLka
- Sahanka lagu sameeyo ardayda fasalka koowaad
- Cabiraadda Rigby PM (1-5)
- Qiimaynta fasalka ee DRA (1-5)
- Qiimaynta degmada ee akhrinta (oo ku salaysan DRA)
- Akhrinta IPT (7-12)

⇩

Tallaabada 4aad
Go'aanka ugu horeeya ee meelaynta ardayga
Haddii aanu ardygu si wanaagsan ugu gudbin mid ka mid ah sadexda qiimayn ee lagu sameeyey oo tallaabada sadexaad ee kore, waxa uu xaq u yeelanayaa adeegga ELLka.

⇩

Tallaabada 5aad
Wargelinta Waalidiinta

Waalidiinta waxaa lagu wargeliyaa toban cisho gudahood haddii gabadhooda ama wiilkoodu uu xaq u yeeshay in la diiwaageliyo adeegga ELLka. Waxaana sidoo kale la wargeliyaa darajada uu keenay ku hadalka, akhrinta iyo qoraalka afka ingiriisiga iyadoo la isticmaalo foomka loogu tala galay ee degmada. Wargelintaas waxaa ka mid ah waqtiga ardaygu qaadanayo iyo nooca adeegga uu ka helayo ELLka. Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin inay ubadkooda ka reebi karaan barnaamijkan.

Tallaabada 6aad

Macalimiinta:

Gali “Haa” LEPga iyo “Taariikhda” biloowga ee TSISka

Faahfaahin guud oo ku saabsan darajooyinka ELLka.

Darajada 1aad

Darajada 1aad (bilowga) ee ardayda baranaysa afka ingiriisiga waa kuwo aan ku hadlin ama si kooban ugu hadla afka ingiriisiga. Marka uu sanad dugsiyeedku dhamaado waxa ay fahmi karaan erayo badan oo cusub iyo naxwe fudud, waxaana u fududaada inay wax badan ka fahmi karaan dulucda hadalka ee ficilka lagu lamaaniyey. Xog is weydaarsigoodu wuxuu ku kooban yahay mowduucyo kooban oo ku salaysan khibradooda shakhsiga ah, laakiin iyadoo ay ku adag tahay ayay sheegan karaan baahidooda. Inkastoo ardayda u soo haajirta Marykanka ay ku kala duwan yihiin aqoontooda afka ingiriisiga, hadana waa wax iska caadi ah in ardayda joogta Maraykanka sannad ama ka yar ay ka bilabaan barashada afka darajada 1aad. Barashadooda luqadda ingiriisiga waa mid isa soo taraysa lagana garan karo sida ay ugu hadlaan afka ingiriisiga.

Darajada 2aad

Ardayda daraja 2aad (ka koreeya bilowga) waxay dhisi karaan sheeko gaaban iyo qoraal kooban oo inta badan ku saabsan mowduuc ay yaqaanaan. Erayada ay yaqaanaan oo kooban darteed ayay soo celceliyaan erayo isku mid ah ama iyagii oo si kala duwan loo qoray. Waxa ay si is daba joog ah u adeegsadaan dulucda iyo maqalka iyagoo inta badan mala awaala xaaladaha ay ka hadlayaan. Waxyaabaha ay qoraan waxa ay caan ku yihiin erayo cusub oo kooban iyo jumlado waqtiga ku saabsan. Akhrinta iyo qoraalka luqadda cusub ee ay barteen waxbaa ka dhiman umana hormarsana sida ay qayb ahaan hadalka ugu horumareen.

Darajada 3aad

Darajada 3aad (dhexe) waxay si sax ah u fahmi karaan afka ingiriiga ee lagu wada hadlo iyagoo isticmaali kara jumlado kala duwan kuna soo celin kara. Waxaa mararka qaar ku adkaanaya sixitaank naxwaha, laakiin haddii ay xoogaa taageero ah helaan way ka gudbi karaan. Barashadooda erayada cusub waa mid ay u isticmaali karaan waxyaabaha la soo gudboonaada. Waxay adeegsan karaan naxwaha afka ingiriisiga ee inta badan la isticmaalo waxaase badan kara qaladka ay sameeyaan marka ay sii dabaashaanba mowduucyada aanay horey u arag iyo marka isticmaalka luqadda sii adkaataba. Iyada oo la kaashanayo kaabayaasha waxbarashada ee suurogalka ah iyo dariiqada ku haboon, ardayda heerka 3aad waxay afka ingiriisiga u baran karaan si la socon karta da'dooda. Akhrinta iyo qoraalku way ka soo daahaan oo ardayda uguma fududa sida ku hadalku afka ingiriisgu uu ugu fudud yahay.

Darajada 4aad

Ardayda darajada 4aad (horumaray) waa arday aad ugu hadla afka ingiriisga laakiin ay weli ka dhiman tahay heerkii laga rabay inay ka gaaraan akhrinta iyo qoraalka luqadda ee ardayda heerkooda ah. Waxay u soo gudbin karaan fariintooda hadal ahaan si dhamaystiran oo la fahmi karo laakiin weli ma gaarsiisna heerkii laga rabay qoraalka iyo akhrinta. Luqadoodu qalad kama marna laakiin kahaldkaasi ma aha mid wax u dhimaya ujeedada. Iyada oo la kaashanayo kaabayaasha waxbarashada ee suurogalka ah iyo dariiqada ku haboon, ardayda heerka 4aad waxay afka ingiriisiga u baran karaan si la socon karta da'dooda.

Su'aalaha la is waydiin karo (Frequently Asked Questions)

1. **Ilamahygu waxa uu ku dhashay halkan. Sidee Macalimiinta ELLku u gargaari karaan?**

Ardaygu wuu ka faa'iidaysan karaa adeega ELLka xitaa haddii uu ku dhashay Maraykanka haddiiba uu hor bartay luqad aan af ingiriisga ahayn ama uu ka soo jeedo guri inta badan looga hadlo luqad aan af ingiriisi ahayn. Ardaygu waa inuu xaq u yeeshaa adeega ELLka ka dib marka ay qiimayn ku sameeyaan maamulka waxbarashada.

2. **Ilamahygu si wanaagsan ayuu ugu hadlaa afka ingiriisiga. Muxuu ugu baahan yahay adeega ELLka.**

Ilmahaaga waxaa suurogal inuu darajo sare kaga dhaco ELLKa. Ardada darajada sare ka gasha ELLka way si wanaagsan ugu hadli karaan afka ingiriisiga, laakiin waxay baranayaan luqaddii ay u baahnaayeen si ay si wanaagsan ugu qoraan una akhriyaan afka ingiriisiga si heerkooda ah.

3. **Ma diidi karaa in ilmahayga ay taageero ka helaan ELLka?**

Waa suurogal inaad diidi karto in ilmahaaga taageero ka helo ELLka. Waxaad la xiriiri kartaa macalinka ELLka ee ardaygaaga. Macalinka ELLku waxa uu ku waydiisanayaa inaad waraaq saxiixdo.

4. **Ilaa intee ayuu ardaygu taageero ka helayaa ELLka?**

Inta badan 1 – 3 sano ayay ardaydu si wanaagsan ugu *hadlaan* afka ingiriisiga. Barashada luqadda looga baahan yahay akhrinta, qoraalka iyo in ardaygu si fican ugu fahmo dugsiga waxay qaadataa 5 – 10 sano. Qiimaynta joogtada ayaa cadaynaysa baahida ardaygu u qabo in uu taagero ka sii helo barnaamijkan. Guud ahaan, ardayda degmada 196 waxay barnaamijkan dhamaystaan sanado ka yar mudadii uu gobolku ugu tal galay.

5. **Sidee ardaydu uga baxaan (dhamaystaan) barnaamijka ELLka?**

Qiimaynta lagu sameeyo ardayga iyo tan macalinkiisa ayaa lagu ogaadaa in ardaygu aanu u baahnayn taageerada uu ka helo barnaamijka ELLka. Marka ardaygu gaaro darajada "ugu sareysa" ee akhrinta, qoraalka iyo ku hadalka afka ingiriisiga imtixaanada laga qaado iyo qiimaynta macalinkiisu ku sameeyo.

6. **Degmadu ma qabtaa barnaamijyo luqadaha kala duwan ah?**

Barnaamijka ELLka waxaa wax lagu bartaa afka ingiriisiga. Inkastoo ay dhici karto in macalimiintu ay ku hadlaan luqado kala duwan, hadana degmadu ma laha barnaamij ELL oo luqadaha kale loogu talo galay. 60 – 70 luqadood ayaa looga hadlaa guryaha ay ka soo jeedaan ardayda dhigata 28ka dugsiga ee degmada 196.

7. **Maamulka waxbarashadu ardayda ma waydiiyaa sharciga ay waddanka ku joogaan?**

Maya. Sanadkii 1982kii ayaa maxkamadda sare goysay kiiska Plyer v. Doe [457 U.S 202 (1982)] kaas oo ka dhigaya ardayga aan sharciga ku lahayn wadankan inuu la xuquuq yahay dhinaca waxbarashada ardayda wadanka u dhalatay ama leh deganaasho sharci ah. Iyadaa taa maanka lagu hayo, dugsiyadu ma samayn karaan wixii "caqabad" ama turunturo ku noqo kara xaqa qof kastaa u leeyahay inuu helo waxbarasho. Taas waxaa ka mid ah in ardayda ama waalidiinta la waydiiyo inay tusaan ama la waydiiyo sharciga ay waddanka ku joogaan.

Waan ogsoonahay waxaad qabi kartaan su'aalo kale. Haddii ay sidaa tahay buuxi shaxda loogu talagalay ee bogga ELLka ama waydii macalinka ardaygaaga ee ELLka.